

Dib u dhiska saraha dhaadheer

Wargeyska Bulshada

Maarso 2024



Daabacaadan, ka akhriso qorshayaashayada guryaha cusub ee Victoria St, Flemington iyo Abbotsford St, North Melbourne. Sidoo kale, baro Chris, oo ka mid ah saraakiishayada raritaanada, taageeraya kiraystayaasha North Melbourne iyo Flemington sites.

Muuqaalada gudaha ee guryaha cusub ee la dhamaystiray ee Victoria St, Flemington.

Kiraystayaasha u guuraya Victoria St, Flemington

Kiraystayaasha ayaa durba bilaabay inay u guuraan guryahooda cusub ee Flemington.

Dib u dhiska goobta guryaha ee Victoria Street waxa ay keentay 359 guri oo cusub, oo ay ku jiraan 240 guri oo ah guryaha bulshada iyo 119 guri oo la awoodi karo.

Guryaha ah 1ka, 2da, 3da iyo 4-ta qol ah waa kuwo casri ah oo leh tamar beekhaamin, kuwaas oo ka dhigaysa kuwo ay aad ugu raaxaysan karaan dadka degan.

Iyadoo lagu bixinayo hal abuur ah Qaabka Kiraynta Dhulka, guryaha cusub waxay keenayaan korodhin dhan 21% oo ah guryaha bulshada ee goobta waxayna beddelayaan guryihii gabowga noqday ee aan hadda ku habboonayn ujeedada.

Goobta la cusboonaysiiyay waxa kale oo ka mid ah isku xidhka la wanaajiyay ee goobta, taas oo leh meelaha dadka lugaynaya ay maraan iyo kaabayaasha baaskiilka oo la dayactiray, albaabka barxada iyo goobta ay carruurtu ku ciyaaraan oo loogu talagalay bulshada Flemington inay ku raaxaystaan.

In ka badan 50 kiraysteyaal oo soo noqonaya ayaa dib ugu soo guuri doona Victoria Street isla markaasna degi doona guryahooda cusub dhamaadka Febraayo.

Guryaha soo hadhay waxa loo qoondayn doonaa Diiwaanka Guriyaynta Victoria, iyo sidoo kale kiraystayaasha laga soo raray Flemington iyo qoysaska kale ee u baahan guryo bulsho iyo kuwo la awoodi karo ayaa dhawaan qaadan fursadaha guryaha cusub.

Homes Victoria waxay aqoonsan tahay Mas'uuliyiinta Dhaqanka ee dhulka lagu dhisayo guryahan. Waxaan xushmad u heynta odayaashoodii hore, kuwa jooga iyo kuwa imaan doona.

Guryo dheeraad ah oo cusub oo ku yaal Waqooyiga Melbourne

Waxaan ku soo dhowdahay xilligii dhammaystirka 127 guri oo cusub oo casri ah, tamar hufan iyo guryo bulsho oo la geli karo oo ku yaal North Melbourne, kuwaas oo u dhow dukaamada, gaadiidka iyo adeegyada.

Goobta waxaa sidoo kale qeyb ka ahaan doonta goob cusub oo dadwaynaha u furan iyo isku xidhka shaqooyinka, adeegyada bulshada iyo Dugsiga Hoose ee Waqooyiga Melbourne.

HousingFirst waa hay'ada bixisa guryaha bulshada ee goobta kuwaas oo qabanqaabin doona safarro ay goobta booqasho ugu tagayaan dadka mustaqbalka dhow degi doona dhowaan.



Xaflad cunto cunis (Community Barbecue) ee Waqooyiga Melbourne

Iyada oo qayb ka ah hindisaha jeexida Jidka Hore u socodka, xaflada cunto cunista (Community Barbecue) ayaa la qabtay dhamaadkii sanadkii hore iyada oo lala kaashanayo Luuqada iyo Barashada Waqooyiga Melbourne. Dhacdadan waxay isu keentay dadka deggan Waqooyiga Melbourne iyo Flemington si ay ula kulmaan deriskooda iyo bixiyayaasha adeegga bulshada. Cimilada oo wanaagsaneed marka laga soo tago, waxaa si weyn isugu soo baxay dadka deegaanka iyo adeeg bixiyayaasha oo ka helay cuntada macaan, kafeega, waxaana laga doodayay qaababka si wadajir ah loogu taageeri karo bulshada deegaanka.

Dhinaca kale: Kiraystayaasha ku raaxaysanaya barbecue-ga Bulshada North Melbourne





Horumarinta Qayimka iyo Mabaadi'da Bulshada



Si loo hubiyo inaan dhagaysanayno oo aan ka faa'iidaysanayno waayo-aragnimada nololeed ee kiraystayaasha intii lagu jiro dib-u-dhiska guryaha dhaadheer, waxaanu si wada jir ah u qaabaynaynaa tiro ka mid ah qiyamka iyo mabaadiida bulshada si ay u hagaan sidii aanu ula xidhiidhi lahayn una hawlgelin lahayn kiraystayaasha.

Qiimaha iyo Mabaadi'da Bulshada waxaa loo sameeyay laba marxaladood:

Marxaladda 1aad: Ka-qaybgalka Hore (Waxa la qabtay Diseembar 2023)

Marxaladda 2aad: Ka-qaybgalka Kiraystaha (Waxay dhacaysaa qaybta hore ee 2024)

Bishii Diseembar, waxaan la hadalnay sagaal kooxood oo ah kireysteyaasha ku sugan St Kilda, South Melbourne, Horace Petty, Prahran, Windsor, Richmond, Brunswick, Collingwood, iyo Carlton, kuwaas oo noo sheegay in daahfurnaanta, ixtiraamka iyo ka-qaybgalka dhabta ah ay yihiin waxyaabaha ugu muhiimsan. Waxaan ognahay in arimahaas ay muhiim kuu yihiin waxaana hadda u isticmaaleynaa ra'yiga nalala wadaagay si aan u qaabeyno qiyam ah iyo mabaadi'da lana shaqayn doono dhammaan bulshada kiraystaha bisha Abriil.

La kulan Sarkaalka Dib udejinta Christopher



Sarkaalka Dib-u-dejinta,
Christopher Tuiloma

Intee in le'eg ayaad ka shaqeynaysay dooraaga shaqo?

Waxaan la shaqaynayay kiraystayaasha guryaha dadweynaha ee Victoria laga soo bilaabo 2015 waxaana sidoo kale ahaa sarkaalka dib u dejinta ee Homes Victoria laga soo bilaabo Diseembar 2022.

Maxaad ugu jeceshahay shaqadaada?


Waxaan u arkaa inay si cajiib ah faa'iido ugu leedahay inaan awoodno inaan saameyn togan ku yeelano noloshu dadka anagoo ka caawinayna inay helaan guri ammaan ah oo ku habboon. In aan awoodo in aan ka caawiyo shakhsiyaadka iyo qoysaska sidii ay u heli lahaayeen meel ay u aqoonsan yihiin hoygooda waxayna igu abuurtaa dareen farxadeed oo weyn.

Maxaad u go'aansatay inaad noqoto sarkaalka dib-u-dejin?

Waan ogahay in guuritaanku runtii noqon karo caqabad xitaa waqtiga ugu fiican, sidaa darteed waxyaabaha igu dhaliyay inaan noqdo sarkaalka dib udejin waxaa ka mid ah inaan dadka taageero inta hawshaas lagu jiro ka hor, inta lagu jiro iyo ka dib guuritaanka.

Sidee muhiim ugu tahay dhegeysiga iyo isu naxariisashada dooraaga?

Waxaan aad u aaminsanahay muhiimadda uu leeyahay fahamka iyo ixtiraamka qof kasta sheekadiisa. Dhageysiga iyo ka jawaabista welwelka kireystaha iyo waxa ay nala wadaagayaan ayaa ah waxa ugu muhiimsan marka lala macaamilayo inta lagu jiro habka dib u dejinta.





Wararkii u dambeeyay ee raritaanka

Flemington iyo North Melbourne

Kooxda raritaanku waxay la kulmeen in ka badan 94% qoysaska si ay u fahmaan baahiyahooda, dookhooda, iyo xiriiradooda bulshada. Kooxda raritaanku waxay isticmaali doonaan fahamkooda si ay guri cusub ugu helaan qoys kasta. Bixinta guryaha ayaa loo bilaabay kireystayaasha la kulmay kooxda raritaanada kuwaas oo ogolaaday inay helaan dalabyada xaafada ama meelaha kale iyadoo loo eegayo baahidooda iyo xulashadooda. Kireystayaasha dib u dejinta loo sameynayo waxay heli doonaan laba dalab waxayna xaq u yeelan doonaan inay ku soo laabtaan goobta marka dib u dhisida la dhamaystiro. Xuquuqdan waxay xaqiijinaysaa in kiraystayaasha ay helaan fursad ay ku tixgeliyaan guryaha bulshada ee laga heli karo goobta iyo in ay go'aan ka gaaraan in ay dabooli doonto baahidooda.

Guryaha kale ee dhaadheer

Qoysaska ku nool meelaha kale ee aan hadda loo baahnayn inay ka guuraan wali waxaan wadnaa sidii aan xiriir ula sameyn lahayn si aan u siino talo iyo taageero. Marka la gaaro wakhtiga guuritaanka, xasuusnoow adeegyada taageerada ee soo socda isla markaasna aad heli karto:

- Kooxda dib u dejinta, oo ay ku jiraan saraakiisha, sida Christopher, ayaa ku siin doona taageero shakhsi ah.
- Adeegyada fasiraada iyo turjumida ayaa la heli karaa si ay kuu taageeraan.
- Waxa kale oo lagugu soo dhawaynayaa inaad ka qayb qaadato taageerada ama adeegyada sharciiga ah si ay kuu caawiyaan.
- Shaqaalaha taageerada dib-u-dejinta goobta iyo kalfadhiyada macluumaadka joogtada ah si ay uga jawaabaan su'aalo kasta isla markaasna ay u bixiyaan macluumaad waxtar leh.
- Homes Victoria waxay dabooli doontaa kharashyada macquulka ah ee ku baxa dhammaan raritaannada oo ay ku jiraan kharashyada alaab rarista, alaabta baakadaha, soo xirida adeegyada sida korontada, gaaska, intarneedka, kharashka soo xirashada teleefoonka iyo lacagaha ku baxaya in waraaqaha boostada lasoo wareejiyo.



Wixii la hagaajinayo iyo howlaha dayactirka ee wali socda

Wixii dayactir degdeg ah, fadlan kala xidhiidh Xarunta Wicista Guriyeynta **13 11 72** ama booqo:

housing.vic.gov.au/repairs

Suaal ma qabtaa?

Nagala soo qeybgal kalfadhiga macluumaadka xiga ee dabaqaaga.

Ka eeg dhismaha gurigaaga warqado lagu soo dhejiyay oo ku saabsan kalfadhiyada macluumaadka ee soo socda.

Macluumaad intaas ka badan

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid fadlan la xiriir xafiiska guryaha ee xaafadaada ama booqo:

homes.vic.gov.au/high-rise-victoria

ama iimayl u dir

enquiries@homes.vic.gov.au

Fasiraada

